HA KA BAQIN GEERIDA

Ciise wuxuu ku yidhi iyada, Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha, kii i rumaystaa in kastoo uu dhinto, weli wuu noolaan doonaa, oo ku alla kii i rumaystaa weligii ma dhiman doono...

Yooxanaa 11:25-26

WAXAA JIRA AFAR XAQIIQO OO AAN U BAAHANAHAY INAAN SI BUUXDA U FAHANNO:

1 ALLAHA KU JECEL.

ILAAHAY WUXUU RABAA INAAD JANNADA KULA NOOLAATO NOLOL WELIGEED AH.
Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah. YOOXANAA 3:16
ILAAH WAXA UU RABAA IN AAD HESHO NOLOL BADAN OO MACNO LEH.
Tuuggu wax kale uma yimaado inuu wax xado oo dilo oo halleeyo mooyaane, aniguse waxaan u imid inay nolosha haystaan oo ay badnaan u haystaan. YOOXANAA 10:10

SI KASTABA HA AHAATEE, DAD BADAN AYAAN LA KULMIN NOLOL MACNO LEH OO AAN HUBIN NOLOSHA WELIGEED AH SABABTOO AH...

2 DADKU DABEECAD AHAAN WAA DEMBIILE. TANI WAXAY NAGA SOOCDAY ILAAHAY.

DHAMMAANTEEN WAXAAN NAHAY DEMBIILAYAAL.
Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah; ROOMA 3:23

CIQAABTA DEMBIGU WAA DHIMASHO.
Waayo, mushahaarada dembigu waa dhimashada... ROOMA 6:23

WAXAA JIRA LABA NOOC OO DHIMASHO AH OO LAGU SHEEGAY BAYBALKA:
▪ GEERIDA JIRKA
Waxaa dadka looga dhigay inay mar dhintaan, taas dabadeedna la xukumo, CIBRAANIYADA 9:27
▪ DHIMASHO RUUXI AH AMA KALA GO'A WELIGEED AH
Laakiinse kuwa fulayaasha ah, iyo kuwa aan rumaysan, iyo kuwa karaahiyada ah, iyo gacankudhiiglayaasha, iyo kuwa sinaysta, iyo saaxiriinta, iyo kuwa sanamyada caabuda, iyo beenlowyada oo dhan waxaa qaybtoodu ku jiri doontaa badda ay dabka iyo baaruuddu ka ololayaan, oo taasuna waa dhimashada labaad. MUUJINTII 21:8

HADDII AADMIGU DEMBIGIISA DARTIIS ILAAHAY UGA SOOCAY, MAXAA XAL U AH DHIBAATADAN?
INTA BADAN WAXAAN U ARAGNAA KUWAN INAY YIHIIN XALALKA:

DIINTA, CAMALKA SUUBAN, AKHLAAQDA

SI KASTABA HA AHAATEE, WAXAA JIRA HAL XAL OO KALIYA OO ILAAH SIIYEY.

3 CIISE MASIIX WAA JIDKA KELIYA EE JANNADA LAGU TAGO.

SIDAN AYUU ILAAHAY YIDHI.
Markaasaa Ciise wuxuu Toomas ku yidhi, Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku yimaado maahee. YOOXANAA 14:6

CIISE MASIIX WUXUU SI BUUXDA U BIXIYAY CIQAABTA DEMBIYADAADA.
Maxaa yeelay, Masiixba mar buu u xanuunsaday dembiyada. Isagoo xaq ah ayuu u xanuunsaday kuwa aan xaqa ahayn aawadood inuu inoo keeno Ilaah. Xagga jidhka waa laga dilay, laakiinse xagga ruuxa waa laga nooleeyey. 1 BUTROS 3:18

ILAAH WUXUU LEEYAHAY BALLAN NOLOSHA WELIGEED AH.
Kii Wiilka rumaystaa, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, kii aan Wiilka rumaysanse, nolosha ma arki doono, laakiin cadhadii Ilaah ayaa ku taal isaga. YOOXANAA 3:36

SI KASTABA HA AHAATEE, KUMA FILNA IN LA OGAADO WAXA CIISE MASIIX INOO SAMEEYEY.

4 WAA INAAN RUMAYSNAHAY RABBI CIISE MASIIX BADBAADADAYADA AAWADEED.

BADBAADADAYADA WAXAY KU SUURTAGASHAY NIMCADA ILAAH XAGGA RUMAYSADKA CIISE MASIIX.
Waayo, idinku waxaad ku badbaaddeen nimco xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuqullada, si aan ninna ugu faanin. EFESOS 2:8-9

DUCADAN ILAAH U BARI ADIGOO IIMAAN LEH:

RABBI CIISE, AAD BAAD UGU MAHADSAN TAHAY JACAYLKA WEYN EE AAD II QABTO. WAXAAN QIRAYAA INAAN AHAY DEMBIILAYAAL OO WAXAAN WAYDIISANAYAA DAMBI DHAAF. WAAD KU MAHADSAN TAHAY INAAD KU DHIMATO ISKUTALLAABTA DUSHEEDA SI AAD U BIXISO CIQAABTA DEMBIYADAYDA. WAXAAN RUMAYSNAHAY SARAKICIDDAADA KUWII DHINTAY. HADDA KA DIB, WAXAAN KUGU KALSOONAHAY INAAD TAHAY RABBIGEYGA IYO BADBAADIYAHAYGA. WAXAAN AQBALAY HADIYADDAADA NOLOSHA WELIGEED AH, NOLOSHAYDANA ADIGAAN KUGU SOO DHIIBAY. IGA CAAWI INAAN AMARRADAADA DHAWRO, OO AAN HORTAADA KU FARXO. AAMIIN

HADDII AAD RUMAYSATO CIISE MASIIX, KUWAN AYAA KUGU DHACAY:

▪ WAXAAD LEEDAHAY NOLOSHA WELIGEED AH.
And this is the will of him that sent me, that every one which seeth the Son, and believeth on him, may have everlasting life: and I will raise him up at the last day. JOHN 6:40

▪ DEMBIYADAADII OO DHAN WAA CAFIYAN YIHIIN.
(HORE, HADDA, MUSTAQBALKA)
Isagu waa inaga samatabbixiyey xoogga gudcurka, oo wuxuu inoo beddelay boqortooyadii Wiilka jacaylkiisa, kaas oo aynu ku leennahay madaxfurasho ah dembidhaafka. KOLOSAY 1:13-14

▪ WAXAAD TAHAY MAKHLUUQ KU CUSUB ILAAH HORTIISA.
TANI WAA BILAWGA NOLOSHAADA CUSUB.
Sidaas daraaddeed haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen, bal eega, wax waliba way cusboonaadeene. 2 KORINTOS 5:17

▪ HADDA WAXAAD TAHAY ILMO ILAAH.
Laakiin in alla intii aqbashay, wuxuu siiyey amar ay carruurtii Ilaah ku noqdaan, kuwaasu waa kuwii magiciisa rumaystay, YOOXANAA 1:12

SAMAYNTA CAMAL WANAAGSAN MA AHA BADBAADO, LAAKIIN WAA CADDAYNTA BADBAADADAYADA.

Buugyarahani waa bilaash. lib maaha.